

Xarumaha hooyga ee Alberta waxay u diyaar garoobeen xiliga qaboobaha

Nufeembar 21, 2024 [Su'aalaha saxaafada](#)

Dawlada Alberta ayaa u diyaarisay taageerooyin dadka bilaa hooyga ah ee ku nool dhammaan gobalka oo dhan xiliga qaboobaha.

Marka cimilooyinka qaboowga ah ay biloowdaan, gobalka ayaa taageeraaya kordhinta xarumaha ku meel gaarka ah ee xiliga qaboobaha iyo xarumaha sanadka oo dhan ee bulshooyinka ku dhaqan dhammaan Alberta, asagoo xaqiijinaaya inay jiraan taageerooyinka ku habboon iyo goobo diiran oo ay seexdaan dadka baahida u qaba.

Alberta ayaa hadda ku maal gelinaysa in ka badan \$116 milyan sanadka 2024-25 si loo taageero shaqada xarumaha hooyga dadka bilaa hooyga ah ee dhammaan gobalka ku nool, koror dhan \$8 milyan. Kororkaan ayaa kordhinaaya xarumaha ku meel gaarka ah ee deegaannada miyiga kajira bilaha xiliga qaboobaha, kuwaasoo dheeraad ku ah goobaha joogtada ah ee bulshooyinka dhammaan xajmiyada kaladuwan ee gobalka oo dhan. Marka la sameeyo goobahaan dheeraadka ah, dawlada Alberta ayaa maal gelinaysa 4,800 xarumaha hooyga ah oo ka jira dhammaan gobalka xiligaan qaboobaha.

“Marka cimiladu qaboow noqoto, waxaan ka fakaraynaa baahiyaha dadka reer Alberta ee nugul. Ayadoo la kordhinaayo xarumaha ku meel gaarka ah ee xiliga qaboobaha tiro deegaannada kamid ah iyo sidoo kale maal gelinteenada joogtada ah ee xarumaha sanadka oo dhan shaqeyta, waxaan ku kalsoon nahay in nidaamkeena hooy bixintu uu diyaar u yahay maareynta kororka ku yimid baahiyaha adeegyada. Sida caadada ahaydba, waxaan sii wadi doonaa inaan kormeerno baahiyaha bulshooyinka qabaan si aan u xaqiijino inay caawimaad helaan dadka u baahan xiligaan qaboobaha.”

Jason Nixon, Wasiirka dadka waayeelka ah, Bulshada iyo Adeegyada Dadwaynaha

Dawlada Alberta ayaa bixisay maalgelinta tiro dheeri ah oo xarumaha hooyga ah looguna talagalay haweenka bilaa hooyga ah waxayna kordhisay xarumaha hooyga ay maamulayaan dadka asaliyiinta ah ee gobalka, Edmonton ku nool.

Gobalka ayaa kordhiyay wadarta guud ee maal gelinta xarumaha Hooyga Edmonton 2024 ilaa \$42.5 milyan, taasoo taageeraysa ilaa 1,800 xarumaha hooyga ah, oo ah kuwa ugu badan ee magaalladu yeelato abid. Sidoo kale, dawlada Alberta ayaa la shaqaysay maamuleyaasha hooyga si ay ugu diyaar garoobaan kor u kaca dadka haddii boosas dheeraad ah loo baahdo. Gobalka ayaa ku maal gelinaaya \$42 milyan magaallada Calgary si loo taageero shaqada in ka badan 2,000 oo xarumaha hooyga sanadka oo dhan.

Dawlada ayaa sidoo kale furaysa bog oonleen ah kaasoo muujinaaya tirada maalin kasta ee adeegsiga xarumaha ku kala yaala Edmonton, Calgary iyo qaybaha kale ee gobalka. Xogta waxaa si toos ah u baxsha xarumaha hooyga waxayna sahlayso kordhinta hufnaanta ku xeeran tayada nidamakeena hooyga.

Dawlada Alberta ayaa sii wadi doonta inay la shaqeyso maamuleyaasha hooyga ee gobalka si wax looga qabto awoodana loo saaro adeegyada loogu talagalay dadka qaba baahiyaha ugu adag. Tan waxaa ku jira sii wadista shaqada Xarumaha Xiriirka iyo Taageerada ee labadaba Edmonton iyo Calgary. Way furnaan doonaan waxayna diyaar u ahaan doonaan inay taageeraan dadka reer Alberta ee nugul, asagoo siinaaya helitaanka fudud ee tiro taageerooyinka iyo adeegyada muhiimka ah, dhammaana lagu bixinaayo hal meel. Laga bilaabo Nufeembar 20 labada xarumood ayaa caawiyay ku dhawaad 6,700 oo qof si ay u helaan taageerooyinka kaladuwan, sida hooyga iyo taageerooyinka guriga, dheefaha maaliyada, caafimaadka dhimirka iyo balwada, adeegyada aqoonsiga iyo adeegyada kale ee caafimaadka.

Xaqiiqooyinka kooban

- Xaqiiqooyinka 2024-25, miisaaniyada guud ee xarumaha bilaa hooyga ah iyo ururada bulshada ayaa ahayd ku dhawaad \$210 milyan.
- Dawlada Alberta ayaa sidoo kale bixinaysa in ka badan \$101 milyan si ay u taageerto barnaamijyada maxaliga ah ee loo sameeyay inay dadka ka saaraan hooy la'aanta ayna siiyaan guryo sugan oo la xiriira taageerooyinka ay u baahan yihiin.

Xogta la xariirta

- [Isticmaalka Hooyga ee gudaha Alberta](#)

Wararka la xiriira

- [Ka caawinta maatada ugu tabarta yar ee ku nool Calgary helitaanka taageerooyinka](#) (Luuliyo 2, 2024)
- [Xarunta Fududeynta iyo Taageerada ayaa abid sii furnaan doonta](#) (Maarso 26, 2024)

Su'aalaha saxaafada

[Alysha Wishloff](#)

780-643-6210

Xoghayaha Warbaahinta, Adeegyada dadka Waayeelka ah, Bulshada iyo Adeegga Dadwaynaha